NSW HEALTH

Somali
August 2004
[DOH-7260]

# Waraaqaha Gaarka u ah Bukaan-socodyada
## Privacy Leaflet for Patients

**Waajibaadkayaga**
Adeega caafimaadka dadweynaha ee NSW wuxuu ballan-qaadayaa inuu ilaaliyo macluumaadka shakhsiga u gaarka ah, wuxuuna hirgeliyey tallaabooyinka in lagu dhaqmo waajibaadkeeda ayadoo la raacayo Sharciga Diiwaannada Caafimaadka iyo Qarsoodnimada Macluumaadka (Health Records and Information Privacy Act 2002).

Buugan-yar wuxuu ku siinayaa faahfaahinta waxa uu yahay macluumaadka shakhsinimo ee lagaa qaadayo, sida aad ku heli karto macluumaadkaas iyo ujeeddooyinka macluumaadka shakhsinimo loo adeegsado oo loo faafiyo. Macluumaadkaaga shakhsinimo waxaa ka mid ah faahfaahinta shakhsinimo iyo macluumaadka caafimaad ee shakhsinimo oo la xirriira daawayntaada.

**Uruurinta**
Waxaan uruurinaa macluumaadkaaga shakhsinimo si aan daawayn iyo taloba kuu siino. Natiijooyinka baarista iyo macluumaad dheeraad ah oo la uruuriyo inta lagu daawaynayo waxaa lagu hayaa diiwaankaaga caafimaad. Waxa keliya oo aan uruurinnaa macluumaadka loo baahan yahay oo lagama maarmaanka u ah daawayntaada iyo si loo maareeyo adeegga caafimaadka.

Adiga ayaan si toos ah uga uruurinnaa macluumaadka, intii suurtagal ahba. Waxaan kaloo u baahan karnaa inaan macluumaadka ka uruurinno xirfad-yaqaannada caafimaadka oo adiga ku daaweeyey. Xaaladda degdegga ah waxaan kaloo u baahan karnaa inaan macluumaadka ka uruurinno xubin qoyskaaga ah, saaxiib, daryeele ama qof kale oo naga caawin kara inaan ku siino daryeelka ugu fiican.

Macluumaadkaaga waxaa lagu hayn karaa warqad ama faylasha elaktaroonigga ah. Waxaan samaynaa tallaabooyin kasta oo macquul ah si aan u hubino macluumaadka aan kaa uruurinno in loo kaydiyo si ammaan ah. Sharci ahaan waxaa nala ka doonayaa inaan hayno diiwaannada caafimaad ilaa intii muddo ah ayadoo ku xidhan nooca diiwaanka iyo tas-hiilaadka. Waxaan leenahay nidaamyo iyo qorsheyaal habboon si looga ilaaliyo macluumaadkaaga lumidda, helitaanka aan la ogolayn iyo si xun u isticmaalka.

Haddii aadan doonayn inaan kaa uruurinno macluumaad gaar ah, waxaad u baahan tahay inaad noo sheegto waxaana kaala hadlaynaa cawaaqibta ay arrintaasi u keeni karto daryeelka caafimaadkaaga.

**Adeegsiga iyo faafinta**
Shaqaalaha oo dhan waxaa qabanaya sharciga iyo nidaamka akhlaaqeed oo ah in macluumaadkaaga loo hayo si qarsoodi ah. Shaqaaluhu waxay u adeegsan doonaan ama u faafin doonaan macluumaadkaaga ujeeddooyinka sida tooska ah ula xirriira daawayntaada, iyo siyaabaha aad sida macquulka ah uga filayso daryeelkaaga hadda jira iyo mustaqbalka. Macluumaadkaaga caafimaad ee shakhsinimo waxaa lala wadaagayaa shaqaalaha ku howllan daryeelkaaga si loo gaaro daawaynta kuugu fiican iyo inay gacan siiso maaraynta adeegga caafimaadka ee lagu siinayo. Macluumaadka khuseeya adeegyada caafimaadkaaga ee lagu siiyey waxaa loo diri doonaa dhakhtarka GP-da ee aad sheegatay, inaad si kale sheegato mooyaane. Halkii ay khusaysaba, macluumaadka waxaa loo diri doonaa adeegyada caafimaad ama isbitaaladii ka qaybgalay daryeelkaaga, ama Adeegga Ambalaaska ee NSW (Ambulance Service of NSW), ama waxaa loo diraa dhakhtarka takhasuslaha ah, ama baaritaannada baathoolajiga, raajooyinka iyo wixii la mid ah.

Macluumaadka bukaan-socotada qaarkood waxaa nala ka doonayaa inaan u sheegno hay'adaha Dowlad-goboleedyada iyo kuwa Xukuumadda Commonwealth-ga si loogu dhaqmo sharciyada la xirriira ka-warbixinta cudurrada laysku wargeliyo iyo tiro-koobyada, tusaale ahaan, diiwaangelinta dhalashooyinka & dhimashooyinka. Macluumaadkaaga shakhsinimo waxaa looga baahan karaa caddayn ahaan maxkamadaha haddii laysa-sabiineeyo (wicitaanka khasabka ah).

Macluumaadka bukaan-socodka waxaan u adeegsan karnaa ama u faafin karnaa arrimaha biilasha, warbixinta qaanuuneed iyo ujeeddooyinka kale ee uu u baahan yahay shaqada adeegga caafimaadka NSW, oo ay ka midka yihiin ammaanka iyo tallaabooyinka kor-u-qaadidda tayada. Halkii ay khuseysaba, macluumaadka bukaan-socodka waxaan u baahan karnaa inaan u sheegno Medicare, hay'adaha caafimaadka gaarka ah, ama Wasaaradda Department of Veterans' Affairs, iyo Guddiga Australian Council on Healthcare Standards (ama hay'adaha kale ee la aqoonsan yahay oo la midka ah).

Waxaan u adeegsan karnaa macluumaadkaaga si aan kaala soo xirriirno arrimaha la xirriira ra'yi-baarista qanacsanaanta bukaan-socodka kuwaas oo naga caawinaya inaan qiimayno oo hagaajino adeegyadayada.

Waxaan u adeegsan karnaa ama u faafin karnaa macluumaadkaaga ujeeddooyinka soo socda ayadoo la raacayo Tilmaamaha Qaanuunka ee ku yaalla sharciga qarsoodinimada:

- mashruucyada cilmi-baarista ee danta daweynuhu ku jirto ayadoo la raacayo barotakoolo adag oo ay ogolaadeen Guddiga Cilmi-baarista Insaanka & Akhlaaqda (Human Research & Ethics Committee)
- ujeeddooyinka tababaridda shaqaalaha iyo arday
- ujeeddoyinka kale ee qorshaynta, maaliyadeed ama maaraynta hawlaha adeegga caafimaadka.

Tilmaamaha Qaanuunku waxay hubiyaan in haddii looga baahdo macluumaadkaaga ujeeddooyinkaas ayna adag tahay in la helo ogolaanshahaaga, inta ugu yar ee macluumaadka shakhsinimo in la adeegsado, macluumaadka shakhsinimona waxaa loo haynayaa ayadoo la raacayo habka ugu taxadarka badan.

Waxaan ku waydiisan doonaa ogolaanshahaaga ka hor adeegsiga iyo faafinta macluumaadka shakhsinimo ujeeddooyinka aan ka ahayn kuwa kor lagu qoray, sida nashaadyada dhaqaale-ururinta.

**Helitaanka macluumaadkaaga**

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato helitaanka dhammaan macluumaadka shakhsinimo oo ay ka midka yihiin diiwaankaaga caafimaad ee ay hayaan bixiyeyaasha adeegga caafimaadka ee NSW. Sida caadiga ah waxaa lagu weydiinayaa inaad si qoraal ah u soo codsato helitaanka aadna keento aqoonsi. Waxaa lagaa qaadi karaa ujrad haddii aad codsato koobiyada macluumaadkaaga shakhsinimo ama diiwaankaaga caafimaad.

Helitaanka macluumaadkaaga shakhsinimo duruufaha qaarkood waa la diidi karaa, sida haddii helitaanka macluumaadka lagu siiyo ay halis waxyeello galinayso naftaada ama qof kale.

Haddii aad rumaysan tahay in macluumaadka aan kaa hayno uusan sax ahayn oo khalad lagu sameeyey, fadlan na soo ogaysii anaguna waan sixi doonaaye. Haddii aan rumaysan nahay in macluumaadku uu sax yahay, waxaad codsan kartaa in ra'yigaagana lagu qoro diiwaanka.

Codsiga helitaanka macluumaadka ama sixidda diiwaankaaga caafimaad waa in lagu soo hagaajiyaa Waaxda Diiwaanka Caafimaad (Medical Record Department) ama Maareeyaha Guud ee tas-hiilaadka adeegga caafimaadka aad tagtay.

**Nala soo xirriir**

Haddii aad ka qabto wax su'aalo ama cabashooyin ah qarsoodinimada macluumaadkaaga shakhsinimo, fadlan la soo xirriir:

(Area Health Service contact details / AHS stamp)

Macluumaadka waxaa la bixin karaa ayadoo uu ku caawinayo turjumaan haddii loo baahdo. Adeeggaasi waa lacag la'aan waana qarsoodi.